

Fatxul-miciin fii taqriibi manhaji Saalikiin, Wa-tawdiixil-fiqhi fidiin
Sheekha Haythan Ibn Moxammed Sarxaan (Alle ha xifdiyo)
(Bare hore, Masjidka Nebiga ﷺ)

XUKUNKA SAKADA AFURKA:

(Sakada afurku) Waajib ayay ku tahay qof kasta oo Muslim ah oo ay qorraxdu u dhacday maalinka u danbeeya ee bisha Ramadaan; ha ahaado qof weyn ama qof yar, lab ama dheddig, addoon ama xor, waa haddii uu helayo hal saac (afar xantoobo muggood qof gacantiisu ay dhexdhexaad tahay) oo ka dheeri ah baahiyaha asaasiga ah iyo wixii ay quudan lahaayeen isaga iyo carruurtiisu maalinka iyo habeenka Ciidda.

Ilmihii uurka hooyadii ku jiray in laga bixiyo sakada afurku, waa sunne ee waajib maaha

Xikmadda ku jirta jidaynta Sakada Afurka:

- ✳ Waxay daahirin u tahay qofkii soomay bisha Ramadaan, iyadoo ka daahirinaysa xumaantii iyo hadalladii gefka ahaa.
- ✳ Waxay fuqarada iyo masaakiinta ka baahi tiraysaa dawarsiga maalinka Ciidda.

Xilliga la bixinayo Sakada Afurka:

Xilli ay banaan tahay: waa in la bixiyo ciidda ka hor maalin ama labo maalmood.

Xilli ay sunne tahay: waa in la bixiyo aroorta maalinka ciidda, salaadda ciidda ka hor.

Xilli aanay banaanayn: waa in la bixiyo salaadda ciidda ka dib.

Wax yaabaha guda Sakada Afurka:

Sakada Afurka waxaa guda (1 saac) oo cuntada ay dadku quutaan ah. Beegga halka saac ee burka wanaagsanina waa 2.40g, cunto kastana inta uu miisaakeedu noqdaa loo eegayaa.

Sakadan Afurka, lacag ahaan looma bixin karo.

Beegga Sakada Afurka ee waxyaabaha la quuto kuwooda u caansan:

Bur: 1400g

Qamandi: 2040g

Faasuuliyad: 2060g

Maanshaalli: 2000g

Cadas: 2100g

Timir: 1800g

Bariis: 2300g

Shunbaro: 2000g

Sabiib: 1640g

Qaybaha Sakada marka loo eego qofka qaadanaya iyo qadarka la bixinayo:

[1] Qayb la tixgeliyo qadarka waxa la bixinayo, iyadoon loo eegin ciidda bixinaysa iyo ciidda la siinayo; sida Sakada Afurka.

[2] Qayb la tixgeliyo waxa la bixinayo iyo ciidda la siinayo, sida fidyada loo yaqaano (Fidyatul-adaa) "*Quudi lix miskiin, miskiin kasta saac badhki*".

[3] Wax loo tixgeliyo qofka la siinayo ee aan la fiirin waxa la bixinayo; sida kafaarada dhaarta.